

CenterPoint Energy si mitirada gudaha loo geeyo banaanka ee Lake Street

Milkiile Guri Qaali ah,

Halkan CenterPoint Energy, waxaa naga go'an inaan siino macaamiishayada iyo bulsho weyntaba macluumaad habboon si loo yareeyo carqalad ku timaada hawlaheena dhismo awgeed.

Guud-mar

Laga bilaabo bartanka-May ilaa bilawga xagaaga 2024, qandaraasleyda idman ee CenterPoint Energy waxey ka shaqeyn doonaan xaafadaha Minneapolis ee Uptown, Powderhorn, iyo Phillips si loo bedelo xarumaha gaaska dabiiciga ah, mitirada gudaha banaanka la geeyo si jadwaleyso, la bedelo iyo/ama dib loogu xariiriyo khadadka adeega qeyb weyn ee cusub, oo dib loo soo celiyo goobaha ay saameysey shaqada ee ka baxsan Mashruuca Metro Transit's B-Line. Kooxaha waxey ka shaqeyn doonaan Lake Street ee u dhaxeysa Drew Avenue S. iyo Hiawatha Avenue.

Tuubooyinka loo adeegsado ku bedelida tuubooyinkan iyo mashruucyada casriyeynta waa kuwo u adkeysa dildilaaca iyo qubashada, iyadoo naga caawineysa inaan sii wadno inaan bixino adeeg badqaba, lisku haleyn karo oo aad ku xisaabtami kartid kaas oo aad kaga raaxeysan karto gurigaaga.

Dhinaca Lake Street ee u dhaxeysa James Avenue S. iyo Dupont Avenue S., kooxuhu waxey bedeli doonaan xarumaha gaaska dabiiciga ah, mitirada gudaha banaanka la geeyo si jadwaleyso, la bedelo iyo/ama dib loogu xariiriyo khadadka adeega qeyb weyn ee cusub. Dhinaca Lake Street between Drew Avenue S. iyo Hiawatha Avenue, kooxuhu waxey bannaanka geyn doonaan mitirada gudaha si jadwaleyso waxeyna bedeli doonaan qaar kamid ah khadadka adeega.

Equix Integrity ayaa cusbooneysiisa diiwanadeena ku aadan goobaha khadadka bulaacadaha si la xiriirta khadadka gaaska dabiiciga ah. Michels Corporation ayaa ka shaqeyn doonta kaabayaasha gaaska dabiiciga ah. Q3 Contracting waxey dib usoo celin doontaa goobaha ay saameysey shaqada Michels Corporation. Ma jiri doonto wax qiimeyn ama kharash la xiriira shaqadeena.

Calaamadaynta danabyada

CenterPoint Energy waxey la xiriiri doontaa Gopher State One Call 811 si loo jiheeyo danabyada dadweynaa ee dhulka ka hooseeya sida biyo, bullaacad, iyo koronto. Waxaad arki doontaa calaamado sida rinji la buufiyey iyo calamo danab. Waxaa lagu kala duwi doonaa midabo si loo kala saaro danabyada. Haddii aad soo rakabatay wax khadad gaar ah sida waraabiye ama deyrar eey, waxaan ku weydineynaa inaan ku calaamadeysid agab walba oo kuu habboon. Tusaalooyin waxaa kujira rinji la buufiya, calamo, iyo ulo alwaax ah ee loo adeegsaday in lagu qaso rinji. Calaamadeyn madaxa waraabiye kuma filna. Haddii wax calan danab ah looga tago deyrarka qof gurigii kadib shaqada gaaska dabiiciga ah iyo dib-u-soo-celinta dhammaato, oo kooxuhuna aaney saarin calamada, qofka guriga degani wuu iska saari karaa wuuna tuuri karaa.

U dhaxeysa James Ave. S. iyo Dupont Ave. S. – Shaqada qeybta gugu weyn ee gaaska Dabiiciga ah

Kooxuhu waxey bedeli doonaan labada nooc ee qeybaha ugu waaweyn ee gaaska dabiiciga ah: qeyb leh dhex-roore bir ah oo ballaaran iyo qeyb leh dhex-roore balaastik ah oo yar. Bedelka wuxuu bilawday Abril waxaana la filayaa inuu dhamaado Juun. Inta lagu jiro xiligan, kooxuhu waxey ka hoos shaqeynayaan qorshayaasha gaadiidka ee qandaraaslaha Metro Transit ee Thomas & Sons, iyadoo laga dhigayo Lake Street mid u furan gawaarida laakiin la xirayo is-goysyada midba mar. Faahfaahin dheeri ah waxaa laga heli karaa websayidkeena.

U dhaxeysa Drew Ave. S. iyo Hiawatha Ave. – Khadka adeega iyo shaqada mitirka

Macmiilku wuxuu boostada kaar boosto ah kaga heli doonaa CenterPoint Energy oo sharaxeysa mashruuca kahor inta kooxaha gaaska dabiiciga ah aaney qaban shaqada. Kooxuhu waxey yeelan doonaan aqoonsiyo sawir leh oo soo idantay CenterPoint Energy. Kadib markii macmiil helo kaar boosto, kormeer ayaa imaan doonaa guriga macmiilka si uu u jadwaleeyo ballan taas oo caadiyan waafaqda jadwalka macmiilka. Haddii macmiilku uunan guriga joogin markay imaanayaan, waxey albaabka ku dhaafi doonaan calaamad ku qoran macluumaadka lagala xiriiro si loola jadwaleeyo ballan.

Hal koox ee gaaska dabiiciga ah ayaa caadiyan ka shaqeeya abaare hal xaafad todobaadkii. Ama waxey si buuxda u bedeli doonaan khadka adeega ama dib ugu xiri doonaan xarunta cusub, si ku xiran da'da khadka. Guriyaha intooda badan, kooxdu waxey saari doontaa ugu yaraan hal xidhmo ee dariiqa lagu socod ku jirta ee guriga hortiiisa ah, ka qodi doonaan god mitirka bannaanka ah, oo kasoo duleelin doonaan khadka adeega dariiqa lagu socdo ilaa guriga.

Mitirada gudaha ah, kooxdu waxey sameyn doonaan jadwal laba-ilaa-saddex-saacadooda ah xiligiiba oo waafaqa qofka degan. Waxaan ku dhiirigelineynaa macmiisha iney la shaqeeyaan kooxda si ku aadan halka ay rabaan in mitirku aado, iyadoo hayndaabyada la ogsoonyahay sida ugu yaraan saddex cagood in laga dheereeyo goobaha sida daaqaadaha, albaabada, iyo hawo-bixiyeyaasha. Macmiisha leh mitiro bannaanka ah waxaa lagu ogeysiin doonaa kahor bedelida ama ku xiriirinta khadadka adeegyada xarumaha cusub. Farsamo-yaqaanka ayaa marin u heli doonaa mitirka gaaska dabiiciga ah ee gudaha guriga, keeni doona mitirka bannaanka, oo dib u daari doona agabka tijaabada leerarka kadib marka mitirka cusub lasoo bedelo.

Dib-u-soo-celin

Kadib marka khadka adeega iyo mitirkuba shaqeeyaan, kooxda gaaska ayaa dib ugu buuxin doonta goobaha la qoday dhooqada, dhagxaan, ama daamuur. Tani waxey ahaan doontaa mid ku meel gaar ah kahor intaan kooxda dib-u-soo-celinta imaan. Sagxadaha adag ayaa dib loogu soo celin doonaa xaaladooda hore. Dhinacyada dhimayaasha iyo cawska, kooxda ayaa dib ugu buuxin doonta goobaha caro madow, abuur caws, iyo shabaqo oo dhulka-ku-darmo abaare afar bilood. Kahor intaan la caws-jarin goobta dib loo soo celiyey, saar wixii fiilooyin ah ee isku reebayey bustada.

Macluumaadka xiriirka

Wixii macluumaad dheeri ah iyo si aad iskaga qortid wixii cusub, fadlan booqo CenterPointEnergy.com/Construction. Ku-dhufo “Goobaha Mashruuca,” “Minneapolis,” iyo “Phillips,” “Powderhorn,” ama “Uptown.” Waxaan rajeyneynaa inaan carqalada ugu yareyno sida ugu macquulsan. Wixii su'aalo ah, fadlan la gaar takhasusyahanaka isgaarsiinta CenterPoint Energy's Communication ee hannah.gullickson@centerpointenergy.com ama 612-321-5546. Waad ku mahadsantahay dulqaadkaaga iyo fahankaaga intaan bedeleyno kaabayaasheena. Waxaan kuu rajeyneynaa xili cajiib ah!